

Gargaarka Maaliyadeed – Soo Koobid Luqad Fudud (PLS)

Central Maine Healthcare (CMH) waxay ka go’an tahay inay daaweyso dhammaan bukaanada u baahan daryeel caafimaad, iyadoon loo eegin caymiska caafimaadkooda ama xaaladdooda dhaqaale. Sharciga **Gargaarka Maaliyadeed ee CMH** wuxuu bixiyaa daryeel degdeg ah iyo daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah bilaash ah dadka iyo qoysaska aan caymiska lahayn ee aan awoodin inay bixiyaan kharashka daryeelkooda caafimaad.

Adeegyada u qalma: Adeegyada degdegga ah iyo/ama adeegyada caafimaad ee lagama maarmaanka ah ee ay bixiyaan bixiyeyaasha ku hoos jira Shabakadda Central Maine Healthcare ee hoos ku taxan.

Bukaanada u qalma: Bukaanada aan caymiska lahayn ee dakhliga qoysaskoodu ka hooseeyo 200% heerarka saboolnimada ee federaalka (Federal Poverty Guidelines) ee hadda jira, kuwaas oo gudbiya codsi gargaarka maaliyadeed (oo ay ku jiraan dukumeenti iyo macluumaad la xiriira), oo la go’aamiyo inay xaq u leeyihiin gargaarka maaliyadeed.

Size of family unit	*Maine Free Care	*CMMC, BH, RH Free Care 100% Discount	*CMMC, BH, RH Free Care 55% Discount
1	\$23,940	\$31,920	\$39,900
2	\$32,460	\$43,280	\$54,100
3	\$40,980	\$54,640	\$68,300
4	\$49,500	\$66,000	\$82,500
5	\$58,020	\$77,360	\$96,700
6	\$66,540	\$88,720	\$110,900
7	\$75,060	\$100,080	\$125,100
8	\$83,580	\$111,440	\$139,300
For each additional person, add this amount:	\$8,520	\$11,360	\$14,200

Income Guidelines Last Updated January 25, 2026

Noocyada Gargaarka La Bixiyo:

Isbitaallada CMH waxay bixiyaan daryeel qayb ahaan bilaash ah (qadarka daryeelka bilaashka ah wuxuu u dhigmaa 100% kharashyada la xaqiijiyay ee u qalma, marka laga jaro AGB, balse waligeed kama yaraan 55%).

Shuruudaha waxaa ka mid ah:

- Dakhliga guud ee bukaanka waa inuu ka badan yahay 200% balse uusan dhaafin 250% heerka saboolnimada federaalka (FPL)
- Bukaanku waa inuu yahay **degane gobolka Maine** oo helaya adeegyo degdeg ah ama daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah
- Bukaanku haddii uusan ahayn degane Maine waa inuu helayaa **daryeel degdeg ah**
- Dhammaan ilaha bixiyeyaasha lacagta kale waa in la isticmaalaa marka hore

Bukaan kasta oo xaq u leh gargaarka maaliyadeed **laguma dallaci doono** wax ka badan qadarka guud ee lagu dallaco bukaannada leh caymis (AGB).

Haddii aysan jirin lacag bixin ama codsi gargaar ah, isbitaalku wuxuu u gudbin karaa akoonka hay'ad ururisa deyn, taas oo keeni karta in la diiwaangeliyo dhib ku ah credit-ka bukaanka ama dacwad sharci ah.

Qadarka Guud ee La Dallaco (AGB)

AGB waa qadarka guud ee lagu dallaco bukaannada leh caymis caafimaad marka ay helaan daryeel degdeg ah ama mid lagama maarmaan ah. Waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la eegayo wadarta lacagaha isbitaalku ka helay qorshayaasha caymiska ganacsiga iyo Medicare sanadkii hore oo loo qaybiyo wadarta kharashaadka isbitaalka ee sanadkaas.

Bukaanada u qalma gargaarka waxay heli doonaan qiimo dhimis u dhiganta ama ka badan tan bukaannada caymiska leh.

Dhammaan siyaasadaha rasmiga ah ee CMH waxaa lagu kaydiyaa si elektaroonik ah waxaana laga yaabaa in la beddelo; daabacaad kasta waa in loo isticmaalaa oo keliya haddii ay la jaanqaadayso siyaasadda hadda jirta ee elektarooniga ah.

Member Hospitals	Central Maine Medical Center	Rumford Hospital	Bridgton Hospital
AGB %	45.0%	51.2%	50.3%
Discount % Required	55.0%	48.8%	49.7%
Discount % Offered *	55.0%	55.0%	55.0%

Sida Loo Codsado

Macluumaadka ku saabsan gargaarka maaliyadeed iyo foomamka codsiga waxaa laga heli karaa internetka:

<https://www.cmhc.org/billing-and-financial-information/financial-assistance-at-cmhc> Ama waxaad naga soo wici kartaa **(207) 795-8050**, ama booqo:

Xafiiska Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka
29 Lowell Square, Heerka 1aad
Lewiston, ME 04240